



# Ilaalinta Helitaanka Waxbarasho ee Carruurta reer Guuraaga ah

*Hage loogu talagalay qoysaska iyo barayaasha*

Carruur badan oo ku nool dalka Maraykanka ayaa ah kuwo aad u guurguura ama waxay leeyihiin waalidiin ama mas'uuliyiin aad u guurguura, kuwaas oo ay ku jiraan qaar ka mid ah carruurta ah, ama qayb ka ah qoysaska leh, shaqaale beeraley ah oo reer guuraa ah, kalluumaysato muhaajiriin ah, iyo shaqaale ka shaqeeya warshadaha muddo xilliyeed ama jagooyin.<sup>1</sup> Carruurta reer guuraaga ah ee socotada ah waxay si joogto ah uga guuraan deegaan iyo degmo dugsi oo ay u guuraan degmo kale, socodkooduna wuxuu inta badan saameeyaa helitaankooda waxbarasho. Qaar ka mid ah carruurta reer guuraaga ah ee socotada ah ee aan haysan sharciga socdaalka ee Maraykanka ama kuwa Barta Ingiriisiga ayaa laga yaabaa inay la kulmaan caqabado dheeraad ah oo ku wajahan ka qaybgalka dugsi.

Xaashidan macluumaadka waxa ay iftiiminaysaa caqabadaha helitaanka waxbarasho ee ay la kulmaan carruurta reer guuraaga ah ee socotada ah, waxa ay u sharraxaysaa qoysaska halka ay ka heli karaan caawimo, waxana ay ujeeddadeedu tahay in lagu caawiyo dugsiyada dadwaynaha in ay fahmaan mas'uuliyadda ka saaran u adeegidda carruurta sida waafaqsan sharciyada federaalka ee xuquuqda madaniga ah.<sup>2</sup>

**Waa kuwan waxa aad u baahan tahay inaad ogaato:**

1. Dugsiyada dadweynaha ee K-12 waa inay aqbalaan dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan carruurta reer guuraaga ah, iyadoon loo eegin xaaladda socdaalka ama waalidiintooda.<sup>3</sup> Intaa waxaa dheer, Ciwaanka VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Title VI of the Civil Rights Act of 1964) wuxuu mamnuucayaa dugsiyada dadweynaha inay sameeyaan takooritaan taas oo ku saleysan isir, midab, ama asal qaran.<sup>4</sup>
2. Dugsiyada dadweynuhu waa inay bixiyaan adeegyada kaalmada luqadda ardayda K-12 ee leh aqoon Ingiriisi xaddidan, oo ay ku jiraan carruurta reer guuraaga ah. Dugsiyadu waa inay u aqoonsadaan ardaydan inay yihiin Barteyaal Ingiriisi si loo hubiyo inay helaan adeegyada lagama maarmaanka ah ee taageeraya ka qaybgalka buuxa ee barnaamijyada waxbarashada dugsi.
3. Dugsiyada dadweynuhu waa inay bixiyaan macluumaadka ku saabsan diiwaangelinta, xiisadaha, iyo barnaamijyada kale ee waxbarashada iyo hawlaha ay heli karaan waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah ee leh aqoonta Ingiriisiga ee hooseeyso. Dugsiyadu waxay tan ku fulin karaan iyagoo bixinaya turjumaad qoran oo sax ah ama turjumaad afka ah.



*Kuwani waa tusaaleyaal caqabado ah oo ka hor istaagi kara carruurta reer guuraaa ah inay is-diiwaangeliyaan oo ay helaan adeegyada waxbarasho ee ay xaqa u leeyihiin.*

### **Carruurta reer guuraaa ah waxaa laga yaabaa inay la kulmaan caqabado isdiiwaangelineed marka:**

- Dugsiyadu aay ka mamnuucaan ardayda, oo ay ku jiraan carruurta reer guuraaa ah ee socdaalaya muddo-xilliyeedka ama guura dhawr jeer inta lagu guda jiro sannad-dugsiyeedka, marka ay is-diiwaangeliyaan marka sannad-dugsiyeedku bilowdo.
- Dugsiyadu aay waydiiyaan ardayda cusub inay bixiyaan Lambarada Sooshal Sekuuritiga (Social Security Numbers) ama shahaadooyinka dhalashada ee Maraykanka taas oo aay uga dhigayaan shuruuda isdiiwaangelinta.
- Carruurta degan goobaha, sida guryaha ku meel gaadhka ah ee shaqada, ee ku dhex jira xuduuda juquraafi ee degmada dugsi, waxay la kulmaan oo qabta xeerarka caddaynta degenaanshaha dugsiiga ee ka hortagaya oo caqabad ku noqonayso diiwaangelintooda.
- Ardaydu isku dayaan inay galaan barnaamijyo tacliimeed gaar ah ama waxyaabaha la bixiyo (tusaale, waxbarashada hibada iyo kartida leh) laakiin laga joojiyo ama laga niyad jabiyo inay codsadaan kuwa ama barnaamijyada kale ee fasalka ku habboon iyada oo aay sababtu tahay in aay yihiin Barteyaal Ingiriisi ama aay sababtu tahay in aay hakiyeen dugsigii rasmiga ahaa sababo la xiriira u socdaalida shaqada.

### **Marka la diiwaan geliyo, carruurta reer guuraaga ah waxa laga yaabaa inay sii wadaan inay la kulmaan caqabadaha ka-qaybgalka macnaha leh marka:**

- Dugsiyada sida caadiga ah u qabta qiimaynta aqoonta luqadda Ingiriisiga bilowga sannad-dugsiyeedka waxay ku guuldareystaan inay sidaas ku sameeyaan carruurta reer guuraaga ah ee yimaada bartamaha ama dhammaadka sannadka.
- Waalidiinta, dadka ardayda masuulka ka ah, ama kafaala qaadayaasha aqoontoodu Ingiriisigu aay hooseyso ma helaan adeegyada kaalmada luqadda ee lagama maarmaanka u ah ka qayb qaadashada go'aamada ku saabsan waxbarashada carruurtooda.
- Dugsiyadu waxay si isku mid ah u diiwaangeliyaan carruurta reer guuraaga ah ee xaqa u leh adeegyada kaalmada luqadda fasalada dheeriga ah (tusaale, fasalada dheeriga ah ee xisaabta) iyada oo aan si habboon loo tixgalinin oo fiio gaar ah loogu yeelanin diiwaanada tacliineed ee ardayga ee diwaangelintii hore iyo dhamaystirka koorsada.
- Shaqaalaha dugsiyada waxay si khalad ah ugu maleeyaan ama ugu qataan in qoysaska reer guuraaga ah ee ku hadla luqadaha asaliga ah ay sidoo kale ku hadlaan Isbaanishka waddankii ay ka yimaadeen darteed.
- Carruurta reer guuraaga ah ee xaqa u leh adeegyada kaalmada luqadda iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah *labadaba* waa loo diidaa adeegyada ama taageerada ay u baahan yihiin, ama waxaa loo sheegaa inay u baahan yihiin inay ka hormariyaan hal nooc oo adeegga waxbarashada ah kan kale.



## Maxaa dhacaya haddii Canug reer Guuraa ah uu la kulmo Takoorku ku salaysan Asalkii Qaran, Xaaladda Socdaalka, ama Heerka Bartayaasha Ingiriisiga oo uu kala kulmo Diiwaangelinta ama Ka qaybgalka Dugsiga Dadweynaha?

Waxaad la xidhiidhi kartaa Waaxda Caddaaladda Maraykanka Qaybta Xuquuqaha Madaniga ah (U.S. Department of Justice's Civil Rights Division, CRT) ama Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah ee Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka (U.S. Department of Education's Office for Civil Rights, OCR) haddii:

- Aad aaminsantahay in degmadu ay ka hortagayso ama isku dayayso in ay ka hor istaagto canuga reer guuraaga ah in uu iska diiwaan geliyo dugsiga ama uu galo barnaamijyada tacliinta ama adeegyada sababo la xiriira asalka qaran ama heerka socdaalka.
- Aad aaminsantahay in degmada dugsi aysan siineynin canuga reer guuraaga ah ee ah Bartaha Ingiriisiga adeegyada luqadda ay u baahan yihiin si ay si macno leh uga qayb qaataan barnaamijyada waxbarashada.

Haddii aad la xiriirtay dugsiga oo aysan qaadin tillaabooyin lagu xallinayo welwelkaaga ama aadan ku qanacsanayn inaad u gudbisno welwelkaaga dugsiga, waxaad ka xareysan kartaa cabasho taas (oo lagu heli karo luqado badan) CRT barta ah [civilrights.justice.gov](https://www.civilrights.justice.gov), ama waxaad ka xareeysani karta OCR oo laga helo barta ah [ocrcas.ed.gov](https://ocrcas.ed.gov) (si aad u hesho kaalmada luqadda wac 1-800-USA-LEARN (1-800-872-5327) (TTY: 1-800-877-8339) ama imayl [Ed.Language.Assistance@ed.gov](mailto:Ed.Language.Assistance@ed.gov)).

### Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan eeg macluumaadkan:

- [Dear Colleague Letter: School Enrollment Procedures](#) (Warqada Ogeysiinta Qaaliga ah: Habka Diiwaangelinta Dugsiga) (Maaajo 2014)
- [Fact Sheet: Information on the Rights of All Children to Enroll in School](#) (Xaashida macluumaadka: Macluumaad ku saabsan Xuquuqaha Dhammaan Carruurta in ay iska diiwaan geliyaan Dugsiga School)(Maaajo 2014)
- [Dear Colleague Letter: English Learner Students and Limited English Proficient Parents](#) (Warqada Ogeysiinta Qaaliga ah: Ardayda Ingiriisiga Baranaysa iyo Waalidiinta leh Aqoonta Ingiriisiga Hooseeyso) (Janaayo 2015)
- [Fact Sheet: Ensuring English Learners Can Participate Meaningfully and Equally in Educational Programs](#) (Xaashida macluumaadka: Xaqiijinta in Bartayaasha Ingiriisiga ay si macno leh oo siman uga qayb qaadan karaan Barnaamijyada Waxbarashada) (Janaayo 2015)
- [Fact Sheet: Confronting Discrimination Based on National Origin and Immigration Status](#) (Xaashida macluumaadka: Ka Hortagga Takoorka Ku Salaysan Asal-Qaran Iyo Xaalada Socdaalka) (Agoosto 2021)
- [Fact Sheet: Protecting Access to Education for Unaccompanied Children](#) (Xaashida macluumaadka: Ilaalinta Helitaanka Waxbarashada ee Carruurta Waalidka la jirin ee kaligooda ah) (Juun 2023)

<sup>1</sup> Warqadan macluumaadka waxay isticmaashaa ereyga ah "carruurta reer guuraaga ah" ee adeegsigeeda caadiga ah, si loogu daro carruurta aadka u socdaala ama leh waalid ama mas'uuliyiin aad u socda. Eraygu kuma tiirsana qeexida "carruurta reer guuraaga ah" ee laga helay 20 U.S.C. § 6399(3) (u qeexidda "carruurta reer guuraaga ah" ujeedooyinka barnaamijyada waxbarashada ee ay maamusho Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka Xafiiska Waxbarashada Soogalootiga (U.S. Department of Education's Office of Migrant Education)).

<sup>2</sup> Tusaale ahaan, Waaxaha Waxbarashada iyo Cadaalada ee Maraykanka waxa ay fuliyaan Ciwaanka VI ee Xeerka Xuquuqaha Madaniga ah ee 1964 (Title VI of the Civil Rights Act of 1964), kaas oo mamnuucaya takoorka ay sameeyaan dadka qaata kaalmada maaliyadeed ee dawladaha dhexe ee ku salaysan isir, midab, ama asal qaran. 42 U.S.C. § 2000d. Sida hoos timaada Ciwaanka IV ee Xeerka Xuquuqaha Madaniga ah ee 1964 (Title IV of the Civil Rights Act of 1964), Waaxda Cadaaladdu waxay wax ka qabtaa xadgudubyada ilaalinta loo simanyahay ee ku salaysan jinsiyada, midabka, diinta, jinsiga, ama asalka qaran ee dugsiyada hoose iyo sare ee dadweynaha iyo machadyada tacliinta sare. 42 U.S.C. § 2000c-6. Waaxda Caddaaladdu waxay sidoo kale fulisaa Sharciga Fursadaha Waxbarasho ee loo siman yahay ee 1974 (Equal Educational Opportunities Act of 1974), kaas oo u baahan hay'adaha waxbarashada gobolka iyo degmooyinka dugsiyadu inay qaadaan tallaabada ku habboon si ay uga gudbaan caqabadaha dhanka luqadda ee ka horjoogsanaya ardayda Barta Ingiriisiga inay si siman uga qaybqaataan barnaamijyada waxbarashada gobolka iyo degmada. 20 U.S.C. §§ 1701-1758.

<sup>3</sup> *Eeg, Plyler v. Doe*, 457 U.S. 202 (1982).

<sup>4</sup> *Eeg qoraalka sare 2; sidoo kale eeg Lau v. Nichols*, 414 U.S. 563, 568 (1974).